# Careers Advice

Call **The Careers Advice Service** about English courses... and open up a whole new world of opportunities.

Soo wac **The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** si aad uga waraysato koorsooyinka Ingiriisiga... waxaanad taas ku geli kartaa duni cusub oo fursado badan leh.









**Call and speak to a Somali adviser**
**Si aad la taliye Soomaali ah ula hadasho soo wac**

**0800 093 1555**

**The Careers Advice Service** can help with all your learning needs, from English to a host of new skills.

**The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** waxuu kaa caawin karaa dhammaan baahiyahaaga waxbarashada la xiriira, laga bilaabo Ingiriisiga ilaa xirfado kaloo farabadan.



Do you…

Miyaad...

- Struggle with filling in forms in English?
- Ku rafaaddaa in aad foomamka af Ingiriisi ku buuxiso?
- Have to take someone with you to the doctor or children's school so they can translate for you?
- U baahataa in uu qof kuu raaco takhtarka ama dugsiga carruurta si uu qofkaasi wax kuugu turjumo?
- Wish that you could improve your English but need help with how to go about it?
- Jeclaan lahayd in aad wanaajiso Ingiriisigaaga adiga oo laakiinse u baahan in taas sidii aad ugu dhaqaaqi lahayd lagaa caawiyo?
- Feel that you need to improve your English to get a job in the UK?
- Dareensan tahay in aad u baahan tahay in aad Ingiriisigaaga wanaajiso si aad Ingiriiska shaqo uga hesho?

## Call and speak to an adviser in Somali today

**Maanta na soo wac si aad la taliye Soomaali ah ula hadasho**

"A year ago, my daughter used to have to go with me to the doctor when I was sick… and explain everything to me… now I can finally understand and look after myself and my daughter with confidence."

"Sanad ka hor, gabartayda ayaa takhtarka ii raaci jirtay marka aan xaanuunsanayo... wax kastena way ii macnayn jirtay... iminka oo aan ugu dambayntii wax fahmi karo waxaan si kalsooni leh ku daryeeli karaa naftayda iyo gabartayda."

**0800 093 1555**
**direct.gov.uk/careersadvice**

**Careers Advice**



"Since learning English my son has taught me how to use the computer. So, now I can keep in touch with friends and family around the world and help him with his homework."

"Tan iyo markii aan Ingiriisiga bartay ilmahaygu waxuu i baray sida kumbiyuutarka loo isticmaalo. Waxaan markaas, iminka la xiriiri karaa saaxiibbaday iyo qaraabaday dunida meel kastoo ay joogaan waxaan isagana ka caawin karaa shaqada dugsiga."

## How can **The Careers Advice Service** help you?

## Sidee ayuu **The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** kuu caawin karaa?



- Learning English can open up a host of opportunities for you. Advisers will listen to your needs and find the right English language course for you.
- Barashada Ingiriisiga waxaad ku heli kartaa fursado farabadan. La taliyeyaashu waxay kaa dhegeysan doonaan baahiyaha aad qabto waxayna kuu heli doonaan koorsada luqadda Ingiriisiga ee adiga kuu habboon, xataa kuwa gurigaaga u dhow.



- Advisers will find information on suitable courses for you, whether you want to learn in the daytime or evening or are interested in male or female only courses.
- La taliyeyaashu waxay kuu heli doonaan warbixin ku saabsan koorsooyinka habboon haddii aad rabto in aad waxbarato maalinimada ama fiidnimada ama haddii aad rabto koorsooyin ragga ama dumarka keligood u gaar ah.

- **The Careers Advice Service** has information on over 7,000 English language courses for people whose first language is not English - there's bound to be one for you.
- **The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** waxuu hayaa warbixin ku saabsan in ka badan 7,000 oo koorsooyin oo luqadda Ingiriisiga kuwaasoo loogu talagalay dadka luqaddooda koowaad aysan ahayn Ingiriisiga - waxaa hubaal ah in uu midi kugu habboon yahay.

## Learning English is just the first step!

## Barashada Ingiriisigu waa tallaabada ugu horraysa oo keliya!

With access to nearly one million courses in just about every subject, from nursing and childcare to plumbing and engineering, our advisers will be able to find the right course to help you take the next step to unlock your career.

Lyadoo ay diyaar yihiin ku dhawaad hal milyan oo koorsooyin oo maaddo kasteba leh, laga bilaabo kalkaaliyenimada iyo daryeelka carruurta ilaa xirfadda hagaajinta qasabadaha iyo injineernimada, la taliyeyaashayadu waxay kuu heli doonaan koorsada habboon ee kaa caawin karta in aad tallaabada xigta qaaddo si aad xirfaddaada qufulka uga furto.

How can **The Careers Advice Service** help?

Sidee ayuu **The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** kuu caawin karaa?

- We can advise you on how to get help with childcare while you are studying.
- Waxaannu kaala talin karnaa sida aad u heli karto qof kaa caawiya daryeelka carruurta inta aad wax baranayso.
- By advising you on funding that you may be entitled to receive while you are learning.
- Annagoo kaala talinna maalgelinta aad xaq u yeelan karto in aad hesho inta aad waxbarashada ku jirto.

So, whether you already know what you want to do, or just to have a chat and see what's available, call 0800 093 1555 and speak to an adviser in Somali.

Markaas, haddii aad hore u og tahay waxa aad rabto in aad barato, ama si aynu u wadahadalno oo aynu iskula eegno waxa diyaarka ah, soo wac 0800 093 1555 si aad la taliye Soomaali ah ula hadasho.

**0800 093 1555**
**direct.gov.uk/careersadvice**

**Careers Advice**

"I've spent ten years paying electricians to fix things at home. I must have spent a fortune over the years. But now the shoe is on the other foot… I called **The Careers Advice Service** and they helped me find an English course that suited my needs… then they helped me find a course to become an electrician. Now people pay me!"

"Toban sano ayaan dadka koronto yaqaanka ah lacag siinayey si ay gurigayga waxa ka xumaada u hagaajiyaan. Waxaa laga yaabaa in aan lacag badan sanadahaas oo dhan ku baxshay. Laakiinse sheekadu iminka dhinaca kale ayay isku rogtay... waxaan wacay **The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** waxayna ii heleen koorso Ingiriisi oo ku habboonayd baahiyahayga... ka dibna waxay ii heleen koorso lagu noqdo koronto yaqaan. Iminka dadka ayaa aniga lacag i siiya!"



# Careers Advice

## We speak your language.
## Waxaannu ku hadalnaa luqaddaada.

**The Careers Advice Service** gives free, impartial information and advice to help you improve your skills.

**The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** waxaad ka helaysaa warbixin iyo talosiin madaxbannaan bilaashna ah si lagaaga caawiyo in aad xirfadahaaga wanaajiso.

We can give advice on a wide range of subjects, from learning English to information on training for a new job.

Waxaannu talobixin kaa siin karnaa mawduucyo aad u farabadan, laga bilaabo barashada Ingiriisiga ilaa warbixin ku saabsan tababbarka loo qaato shaqo cusub.

Call **The Careers Advice Service** in confidence today and speak to a friendly adviser in Somali. They'll help find the right course for you.

Kalsooni maanta ku soo wac **The Careers Advice Service (Adeegga Talobixinta ku saabsan Xirfadda)** si aad af Soomaali ugula hadasho la taliye saaxiibtinimo leh. Waxuu qofkaasi kaa caawin doonaa in aad hesho koorsada adiga kuu habboon.



**Call and speak to an adviser in Somali on**
**Si aad la taliye Soomaali ah ula hadasho soo wac**

**0800 093 1555**

**Lines open Monday to Friday, 9am - 5pm.**
Waxay khadadku furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha,
9ka subaxnimo - 5ta galabnimo.

CA09/Somali/leaflet

**0800 093 1555**
**direct.gov.uk/careersadvice**

Careers Advice